# Ujeedo: Ogaysiis

**Safaaradda Hindiya Ee Addis-Ababa** waxay ku war gelisanysaaa muwaadiniinta soomaaliyeed ee u baahan in ay caafimaad u tagaan dalka Hindiya in ay **Saafaardda Hindiya ee Addis Ababa Itoobiya** dib u bilowday bixinta Visa-yaasha Cafimaadka ee dalka Hindiya.

**Sidaaas darteed Safaaradda Hindiya ee Addis Ababa** waxay halkan idin ku soo gudbinaysa **shuruudaha iyo tilmaamaha** laga rabo muwaadiniinta Soomaalliyeed ee u baahan in ay caafimaad u tagaan dalka Hindiya.

**1**. Baasaboorkaaga asalka ah iyo Copy hal boogiisa hore ah oo la soo daabacaay.

**2**. **Warqada cafimaadka:** In aad warqada cafimaadka **(**Medical Report**)** kala timaado cusbitaalada Soomaaliya.

**3**. **Warqadda Casuumadda: (**Invitation Letter**):** Muwaadiniinta soomaalliyeed Waxaa looga baahan yahay in ay haystaan warqad casuumad Rasmi ah taas oo ay ka haystaan Cusbitaal ku yaala dalka Hindiya isla markaan warqada casuumada waa in uu Cusbitaalku u soo diraa Saafaaradda Hindiya ee Itoobiya.

**4. CID:** Warqadda danbi la'aanta.

**5**. **Xogta Maaliyadeed (**Bank Statement**) :** Muwaadiniinta soomaalliyeed ee raba visaha cafimaadka waxaa looga baahan yahay in ay soo qaataan Xisaabta dhaq-dhaqaaqa baankigiisa (Bank Statement), haddii u jiro qof ku kafaalo qaadaya cafimaadkaga waxaa lagaa rabaa Xisaabta dhaq-dhaqaaqa baankigiisa (Bank Statement) iyo copy-ga baasaboorkiisa.

**6.** Buugga Cafimaadka ee yellow ah **(**Yellow Book**)** kaas oo aad Soomaaliya ka soo qaadatay.

**7. Qofka xanuunsaan:** Qofka xanuusanaya waxa loo ogol yahay in uu raaco hal qof oo kaaliye ah kaas oo ay qasab tahay in uu yahay ehelkiisa, qofkii aad u xanuusanaya waxaa laga yabaa in loo ogolaado laba qof.

**8. Caruurta:** Qofka raba in uu caafimaaad u kaxeeyo ilmo caruur ah oo aanu isagu dhalin isla markaana ay da'diisuba ka yar tahay (18 sano) waxaa laga raba in uu soo qaato wakaaalad **(Letter of Responsibility)** taas oo ay qoreen waalidkii dhalay kana soo baxday Notaayo la aqoonsan yahay ama maxakamad dowladeed isla markaana laga soo tastiiqiyay Wasaaraddaa Arimaha Dibedda.

**9. Lacagta Visa:** Saafaardda Hindiya ee Ethiopia, lacagta visaha waxay ku qaadaysa dollar taas oo ah $83 oo kaliya, **(Sarif lama celinayo waa inaa la timaadaa $80+3**) waxaana laga rabaa in aad copy ka soo qaado lacagta isla mar kaana aad soo daabacato.

**10. Wakhtiga Fiisaha:** qadashada fiisuhu waxay qaadan kartaa ilaa 2 maalmood, laakin haddii loo baahdo dukumentiyo dheeraad ah ama caddaymo kale, waxay qaadan kartaa waqti dheeraadda.

**11. Celinta lacagta:** lacagta fiisaha mar haddii la bixiyo lama soo celin karo xaalad kasta.

## Fiiro gaara:

1. Fadlan Application foomka fiisahaaga ka buux-buuxso (link-gan) hoos ku xusan https://indianvisaonline.gov.in/visa/index.html

kadibna soo daabaco oo saxiix, kuna dhaji sawirkaaga.

2. Sida lagu xusay qodobka **9'aad** Lacagta fiisuhu waa **US$ 80+3 = US$ 83** oo kaliya, sidaasi darteed wax intaasi ka badan lama bixin karo, waayo waxaa jira Travel Agency dadka lacag dheerad ah kaga qaata in ay soo saarayaan fiisaha.
3. Safaaradda India waxa ay idinku wagalinaysaa in **Safaaradu toos u bixinayso fiisaha oo aan loo baahnayn in lasoo maro travel agency, dilaal, iyo cid kasta oo waydiinaysa lacag dheeraad ah.**